HM Government

Grenfell community updates

# Grenfell Tower community update: October 2025 - Somali / Af-Soomaali

**Xogta ugu danbaysay ee bulshada Grenfell Tower - Oktoobber 2025**

Waxaan aqoonsannahay in Grenfell Tower uu muhiimad gaar ah oo qoto dheer u leeyahay dadka ay sida aadka ah u saamaysay masiibada iyo in dhulku uu yahay mid xasuus gaar ah ugu fadhiya qoysaska. Waxa aanu doonaynaa in aanu kula socodsiino shaqadeena sida taxadirka leh loogu duminayo Daqaba.

Xogtaan cusub waxaad ku heli kartaa xog dheeraad ah oo ku saabsan:

- **La soco macluumaadka codka, dhaska iyo gariirka**
- **Taageerada caafimaadka iyo badqabka guud**
- **Sida aad noola hadli karto**

Waxa aad ka arki kartaa xogta ugu danbaysay: www.gov.uk/grenfell-community-updates

## Kormeerka macluumaadka codka, dhaska iyo gariirka

Dawlada waxaa ka go'an inay xaqiijiso in dhamaan shaqada goobta dhismaha Grenfell Tower loo qabto sida ugu wanaagsan. Amaanka iyo badqabka bulshada iyo dadka ka shaqeeya goobta ayaa wali ah mudnaanteena koowaad.

Sebteember, waxa aanu baahinay qorshayaasha faahfaahsan ee lagu sameeyay sida aanu u kormeerayno tayada hawada iyo heerarka codka. Waxa aad ka akhrin karaa kuwan oo waxa aad ka eegi kartaa qorshayaasha:
Grenfell Tower: community update September 2025 - GOV.UK

Waxaa jira sadex kormeer gariir oo goobta Tower iyo shay kormeer tayada hawada, oo sadexdan kormeerada hawada ee ku xeeran xuduudka goobta, dhamaan xogta nolosha oo dhan.

Waxa aanu baahin karnaa xogta kormeerada si aad u fahanto saamaynta shaqada aanu qabanayno. Xogtu waxay muujinaysaa hadii heerka loo dejiyay oo la dhaafiyay, iyo hadii uu ku sugan yahay, sababta ay tani u dhacday iyo waxa laga samayn karo,

Waxa aanu baahin doonaa xogtan bil kasta. Xog kasta oo cusub waxay muujin

doontaa natiijooyinka bisha ka horeysa.

Warbixinaha la socodka codka, dhaska, iyo gariirka waa 1-da Sebteember ilaa 28-ka Sebteember 2025.

Warbixinta kormeerka codka – 1-da Sebteember ilaa 28-ka Sebteember 2025

Warbixinta kaormeerka dhaska – 1-da Sebteember ilaa 28-ka Sebteember 2025

Warbixinta kormeerka gariirka – 1-da Sebteember ilaa 28-ka Sebteember 2025

Tani waxaa barbar socda, UK Health Security Agency (UKHSA) oo sii wadi doonta qiimaynta iyo kormeerka tayada hawada ee aaga ku xeeran Grenfell Tower inta ay shaqadu socoto. Waxa aanu bilaabi doonaa in aanu wadaagno warbixinaha bil kasta. Waxaad ka akhrisan kartaa warbixinta ugu dambeysay halkaan: Environmental monitoring following the Grenfell Tower fire - GOV.UK

### Haddii u baahan tahay taageerada caafimaadka iyo badqabka guud

Taageerada shucuurta iyo badqabka ee jirka waxay sii wadaa inay diyaar u tahay qoysaska murugaysan, dadka masiibada ka badbaaday, iyo dadka degan aagga goobta u dhaw inta lagu jiro shaqada sida taxadarka leh loogu duminaayo Dhismaha.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad la hadasho qof, waxaad:

- Wici kartaa Adeegga Badqabka guud ee Grenfell ood ka wici karto 020 8637 6279 (8da subaxnimo ilaa 8da habbeenimo, maalin kasta)
- Kala hadal Central and North West London NHS Foundation Trust's (CNWL) hal meel oo laga heli karo talada xaalada degdega ah, ee: 0800 0234 650 (waxay furan tahay 24 saacadood maalintii, todoba maalmood todobaadkii)
- Iimaylka: grenfell.wellbeingservice@nhs.net
- Booqo: www.grenfellwellbeing.cnwl.nhs.uk si aad u hesho xog dheeraad ah

Wixii macluumaadka ugu danbeeya ee adeegyada la heli karo, booqo www.grenfell.nhs.uk

### Si aad noola hadasho ama aad u ogaato wax dheeraad ah

Waxa aanu doonaynaa in aanu kula wadaagno macluumaadka qaab wax kuu tari kara. Waxa aanu sii wadi doonaa in aanu kula wadaagno xogta ugu danbaysa iyo macluumaadka bilaha soo socda www.gov.uk/grenfell-community-updates hadii aad doorbidayso, waxa aad iimeel kuugu soo diri kartaa wararkeena joogtada ah.

Waxaad la kulmi kartaa saraakiisha iyo qandaraaslaheena koowaad si aad ugala hadasho shaqada, la wadaagto walaacyada aad qabto iyo si aad su'aalo u waydiiso kulamadeena caadiga ah. Waxaan diyaar u nahay inaan shaqsi ahaan ama koox ahaan idin kula hadalno waqtiga, taariikhda, iyo goobta kugu habboon ee aad dooneysaan.

Fadlan nala soo xiriir haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaac ah oo la xiriira shaqada ama aad dooneyso inaad nala hadasho. Waxa aad si toos ah noogala soo xidhiidhi kartaa iimeelka: GrenfellTowerSite@communities.gov.uk

Si aad u hesho xogihii u dambeeyay ee ku saabsan Grenfell Tower, iyo si aad iska qorto fariimaha iimaylka, fadlan booqo: www.gov.uk/grenfell-community-updates ama iskaan garee QR koodhka hoose.

Waxaan jeclaan lahayn inaan adiga kaa maqalno sida aad doorbidayso inaad u hesho wararka ku saabsan shaqadeena ka jawaab celinta musiibadii ka dhacday Grenfell Tower. Haddii aad jeclaan lahayd, waxaad wadaagi kartaa ra'yigaaga adiga oo buuxinaya foomkeena jawaab celinta degdega ah:
Bulshada Grenfell: Foomka Xiriirka Jawaab Celinta - GOV.UK

**Kooxda maamulaysa goobta Grenfell Tower**

**Wasaarada Guriyeynta, Bulshooyinka iyo Dawlada Hoose**